

XIISAYNTA CARUURTA IYO DABKA

Fact Sheet 15 – Community Risk Management. Revised 28/09/2004 – Somali

- NSW FIRE BRIGADES
- NSW RURAL FIRE SERVICE
- ACT FIRE BRIGADE
- ACT RURAL FIRE SERVICE

Ilmahaagu ma XIISEEYAA dabka ?

Caruurta badiyaa ,gaar ahaan wiilasha , waxa laga yabaa inay xiiseeyaan dabka ama ay ku ciyaaraan laytarada iyo kabriidada.

Waxay sheegeen aqoonyahanada caafimaadku inay caadi tahay inay caruurtu xiisayso dabka laakiin waxa haboon in la hubiyo inaan ilmahaagu is gubin ama waxyeelo gaysan xiisayntiisa awgeed.

Waxa jira sababo kala duwan oo ay caruurtu dabka u bilowdo , sababahaas waxa ka mid ah:

- Xiisaynta iyo isku dayidu waa wax la aqbali karo oo qeyb ka ah dabecada waxbarashadood.
- Caruurta qaarkood waxay daari karaan dabka iyadoo ay qeyb ka mid tahay kor ka ilaalinta feejignaanta.
- Cadaadiska caruurta kale ayaa soo jiidasho ku samayn kara inay dabka daaraan.
- Nasiib darro caruurta caraysan ama aar goosi raadinaysaa waxay daar karaan dabka.
- Waxa jira caruur waxyaabo khatar ah samaya sida isku xirisra waxyaabaha dabka dhaliya.
- Aqoonyahanada caafimaadku waxay ku taliyaan in tira yar oo caruurta ka mid ahi ay leeyihiin xiiso aan caafimaad qbin oo u baahan daaweyn caafimaad.

Caruurtu kama war qabto inta badan in olol yari keeni karo dab halis ah.

Maxaad samayn kartaa si aad uga caawiso caruurta ka hortaga xiisaynta dabka?

- Ku xir alaamka qiiqa si joogto ah tijaabi baytarigana ka bedel sannadkiiba mar.
- Ka qeyb gali caruurtaada qorshaha sabotabixida isku dayona sameeya wada jir ahaan si joogto ah
- Markasta kabriidada iyo laytarada meel xafidan dhig. Caruurtu meel bay u fuulaan si ay u helaan.
- Bar caruurta inaanu dabku ahayn wax lagu ciyaaro ee uu yahay wax muhiim ah oo wax lagu karsado ama wax lagu kululaysto marka si badbaado leh loo isticmaalo dadka waaweynina masuul ka yihiin.
- Ha u dirin caruurta inay dab ama laytar kuu keenaan. Caruurtu tusaalayn bay wax ku bartaan iyo ku dayashada waxyaabaha dadka waaweyni samaynayaan.
- Ku dhiiri geli inay ku keenaan caruurtu wixii kabriid iyo laytar ay helaan kuna amaan musuuliyadooda.
- Ha is diidsiin wax kuu cadaynaya in dab lagu ciyaaray sida dharka meel ka gubtay ama kabriidka ama laytarka jeebabka aad ka heshay.
- Hubi inaad caruurta marwalba dusha ka ilaalisid.

HADDII AAD KA WARWARSANTAHAY XIISAYNTA CARUURTA DABKA,

NSW TILIFOONI 1800 600 700, AMA ACT TILIFOONI 6207 9032

**WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH LA XIRIIR XARUNTA DABDAMISKA AMA ILAALINTA DABKA
DEGMADAADA AMA FIIRI WEBSITEKA**

www.fire.nsw.gov.au www.rfs.nsw.gov.au ama www.esa.act.gov.au

TILMAAMAHA BADBAADA XIISAYNTA DABKA

- Bar caruurta waaweyn siday si badbaado leh u isticmaali lahaayeen kabriidka , kuna adkee muhiimada ay leedahay in qof weyni ag joogo marka dabka la shidayo.
- Ka feejignow in caruurta yar yari ay dab ku ciyaaraan qolka ay seexdaan.
- Marka aad hurudid ma urinayssid qiiqa waxaanu ku sii gelinayaa hurdo dheer.

WIXII ARRIN DEGDEG AH TILIFOONI 000